



## **Waxaa socda wareysiga lagu raadinayo kormeeraha guud ee PPS**

Shaqaalaha iyo qoysaska PPS ee qaaliga ah,

Baadi goobka iyo shaqaalaysiinta kormeeraheena guud ee cusub hawsheedii si fiican ayay u socotaa.

Bulshada, guddiga iyo urrurka dibada shaqaalaha ka raadiya waxay soo jeediyeen in ka badan 40 hoggaamiyayaal waxbarasho si loo siiyo tixgelin. Urrurka dibada shaqaalaha ka raadiya iyo Guddigu waxay dib u egeen rajada la filayo iyo musharixiinta iyada oo Guddigu dooratay koox dad kala duwan ka kooban oo leh waayo-aragnimo waxbarasho qoto dheer si ay u wareystaan. Waxaa ka mid ah dad ka kala socda gudaha iyo dibadda Oregon, kormeerayaasha guud ee hada jira iyo sidoo kale hoggaamiyayasha sare ee waxbarashada oo ka socda degmooyinka waaweyn.

Iyada oo lagu salaynayo shuruudo ay tahay in la buuxiyo, Guddigu waxay dooratay toddobada musharax oo la wareysto ka dibna qiyaastii 15 saacadood ku bixiyaan wareysiga iyo ka wadhadalka masharixiintani.

Koox yar oo ka mid ah musharixiinta ayaa dib loogu martiqaaday in mar kale Guddigu wareysi la yeelato saddexda toddobaad soo socota.

Arrimo kale ee la xiriira baadi goobka loogu jiro kormeeraha guud, waxay Guddigu dib eegis ku samaysay nidaamyada la raacayo ee loogu talagalay baaritaanka taariikhda ee musharaxa si macluumaadka loo sii haysto wakhti hore oo ka mid ah hawsha. Guddigu waxay shuruudo la iskaga baahan yahay ku dareen nidaamka qoraalkooda cusub ee la xiriira heshiiska ee kormeeraha guud ee soo socdaa ugu shaqayn doono xuduudaha degmada dhexdooda.

Waxaan sii wadi doonaa in aanu bulshada la socodsiiino nidaamkayaga anaga oo u socona tallaabada xigta ee nidaamka shaqaalaysiinta kormeeraheena guud.

Julia Brim-Edwards

Guddoomiyaha, Guddiga Waxbarashada

Dugsiyada Dadweynaha Portland